

KOWNI

Tixdan gabayga ah waxaan ku qoray magaalada Hargeysa, 17^{kii} Febarweri 1999^{ka}, kuna halqabsaday abwaan aannu rafiiq nahay oo la yidhaahdo Mahdi Xassan Cawed (Farxaan), ayaan isku deyayaa inaan inyar ka idhaahdo Kownka, oo si dulkaxaadsii ah mooyee, dhab u sugidtaankiisa uu Rabbiga abuuray keliyihi ogsoon yahay.

Xagga suugaanta na, waxa aan ku tijaabinayey (oo aan caddeeyey) in xarafka qaafiyadda gabaygu ku socodtaa uu labada qaybood ee beydka ba ugu wada bilaabmi karo.

Ku-dhac gabay Farxaanow abwaan ` kaaf tirsheyska lehe
Kansi weeye kasmadii aqoon- ` korodhsi keentaaye
Kii abuuray goortay kastay ` koboc billawdaaye.

Ka faaloodka duunkiyo khalqiga ` kaamilnimadooda
kasiisiga rumayn-fiiriskaa ` keyf-u-sheeg mudane
kolba aniga oo daayey baa ` kaa dheh lay odhane.

Kelmed xidhan waxaa kuu fasira ` kaaliyow bare e
karaankiisu soo taban garaad ` kaabid aan heline
kaalmaynta Eebboo qudhaa ` kaalsha garadkeene.

Ka fac weyn adduunkani ku' uu ` koobo aadmiguye
kun waxood mar wada eegtidood ` kala aqoon weydo
kala qeexyey Kii noo kamilay ` Kawsar iyo Nuune.

Ka-jaanqaad Kitaabkiyo anoo ` kaalmo sugan eegtay
Kaatunkii Rasuulkiyo anoo ` kaabad adag haysta
kiswadiyo xariiriyo tix mudan ` koolinba aan meersho.

Karaamayn dhammaanteed Rabbaa ` kaamiloyska lehe
kolkaad dhab u rumaysaad heshaa ` kalal deg iimaane
kalsamaan yiqiiniyo xaqaad ` kaddibna taabtaaye.

Kulan-talis Jabaaruutka Boqor ` kulli-ahaan uumay
ku-sugnaan Malaakuutka kore ` karid-qorshayntiisa
Korreeyuhu ku hanay Caalamyada ` kaafinimo weyne.

Keligiis ayaa jira Ilaah ` Kow aho qudha e
kaaftoon ka weeyaan cid kale ` kuu khalqaan kabine
ka nasahan karaan li'i inuu ` kaalmo raadsado e.

Kulligood makhluuqyada nidaam ` Kawniyaw dhigane
kutladkutlad ayaa loo dumaa ` kufiyo jaangoyne

kafiilnimo kan bixiyaa hagoo ` kaabo baa badane.

Kursigiyo Cirshigoy Sideed ` kore u sii hayso
kudhdhan Loox qoraal dhigan miduu ` keli-ahaan haysto
karti-weyne Qalinaa mar hore ` ku sugay Diiwaane.

Kaah Malaa'ig laga uumay nuur ` karamna loo yeelay
kuwo xuma ka-reebanida aan ` kahan awaamiirta
kuwo loo abuurroo xil culus ` kaamilaa jira e.

Koofiyadda tobankooda kore ` kuwo Ilaah doortay
kalsooniyo karaan ruuxiyiyo ` kartida uu siiyey
ku' walbiba ku aad hawsha uu ` kaatibkeed yahaye.

Kuwo aan mar caasiyin Ilaah ` kelmadna soo laabin
kuwo ugu awood badan makhluuq ` koonka u xilsaaran
kuwo kara ku koosayn ilbidhiq ` Koxin ka soo laaban.

Kumanyaal malyuunoo kun baal ` ku wada haadaaya
kumanyaal malyuunoo kaloo ` kicitin boodaaya
kumanyaal malyuunoo hinqada ` kedis markay joogto.

Kumanyaal malyuunoo kalkaal ` kansho ka gaadhsiiya
kumanyaal malyuunoo kasaad ` kuddo ku duulaaya
kumanyaal malyuunoo ku ladhan ` kelmedda Tawxiidka.

Kumanyaal malyuunoo ku jira ` koolin Rabbi caabud
kumanyaal malyuunoon kurkaba ` kore u soo qaadin
kumanyaal malyuunoo Kariim ` kuudud ku baryaaya.

Kumanyaal malyuunoo kaloo ` kuurgal nala jooga
kumanyaal malyuunoo kormeer ` kaydsha ficilkeena
kumanyaal malyuunoo ku qoran ` ku-dhigga Diiwaanka.

Kumanyaal malyuunoo kunuus ` kasabka sii qaybsha
kumanyaal malyuunoo ku sima ` kadabka kii yeesha
kumanyaal malyuunoo ku shuba ` kobiyo roobkeeda.

Kumanyaal malyuunoo kan dhalan ` keena ruux sugayey
kumanyaal malyuunoo korshoo ` kurey xannaaneeya
kumanyaal malyuunoo kadnida ` kii hurda ilaasha.

Kumanyaal malyuunoo korjoog ` kaaliya Islaamka
kumanyaal malyuunoo kilkila ` kibir kanuu taabto
kumanyaal malyuunoo kabjara ` kay nacladi gaadho.

Kadeedkii Qiyaamaha kolkay ` kaabiga u joogto
kumanyaal malyuunoo kaxaas ` kaabad laga yeelo
kumanyaal malyuunoo kan jira ` kiisku ku caddaado.

Kaafuur udgoon soo kamkami ` koos miskiga baahsha
kumanyaal malyuunoo kalsami ` karam Ilaah siiyey
kumanyaal malyuunoo Jannada ` kii muta kaxeeya.

Karoor-adag Sabaaniyada aan ` kal naxa loo yeelin
kumanyaal malyuunoo kakani ` kawrax loo dhaliyey
kumanyaal malyuunoo karbaash ` karaya saydhaaya.

Kumanyaal malyuunaanu karin ` kuliyo naartiisu
kumanyaal malyuunoo kumbiya ` kaafirka Jaciira
kumanyaal malyuunoo kufriiga ` keene ku xabbaadha.

Ku' ku' dhalay kumuu jiro intaas ` kelikelaw uunye
kaslaanimoo kal seexdiyo hilmaan ` kiddib ma sheegaane
kurbo gaara kama ay baqaan ` kaydna ma dhigtaane.

Kariimkoo qudhaa kala yaqaan ` kow u tirintoode
kolkuu doono kumanyaal malyuun ` kooxo kale uunye
kun markuu yidhaahday kacaan ` kuman malyuunaade.

Kawnka sare Farxaanow ninkii ` kore u jeedaasha
kula daalid mooyee indhuhu ` kaafin mahayaane
kasha uu Kitaab dego qudhaa ` kaashifoo daya e.

Kasmo-gaabni aadmigi ku daal ` kuu kasuu yahaye
kallif bay ku tahay kaanu arag ` keeni kari waaye
korkaxaadi mooyee garaad ` kooban soo noqoye.

Kutub hore Furqaan kaamishiyo ` korin-aqoomeedka
kudhan wajibaadkay dhigtiyo ` kow-labuu-fulinta
korodhsiga tacliintiyo xikmado ` kaabayaa ladha e.

Ku ilhaanyey ruuxii siciid ` ku dhashay iimaane
kari waa kan beenshaa illeeyn ` kaafir waa shiqibe
kanuu Eebbe doonoo qudhaa ` keensamoo qira e.

Kor u dhugo cirkaas kore bal eeg ` kabad li'idiisa
kalkii uu Rasuulkeenu tegey ` korena loo dheelmay
ka bogoo Micraajkii rumee ` Kawnka waad barane.

Kor ahaaye Weynaha u daa ` kaamilnimo qaab leh
kamaalnimo ku dheehnida sargo'an ` Karam-Uluuhaadku

kun jibaar ka sii badan kanay ` keento firaduye.

Kalafogi Samaawaadka kore ` kala korrayntooda
kabti-orod lukowluhu u socoy ` kuman sanoo caame
kadin laga galiyo tii kastana ` kaaliyaa fura e.

Koonka lagama seexdoo lulmiyo ` koodin baan jirine
kun sanyu tirinaa ka dhigan ` kiisa maalin ahe
kobta laga hoggaamiyo dhulkiyo ` koreba weeyaane.

Koolkoolin badan kore-u-qaad ` kuuni la ilraaco
kordhiniyo ku-soo-darid hagaag ` korodhka foon dhaafa
kedisiyo adoon filan ku-bood ` kama' ku liibaanka

kala-beddel ka-soo-darid quluul ` kufid u-raacsiinta
kadeed abida ka cabaadintiyo ` kaadiniyo raajis
Kariimkaa wixii dhacay dhigoo ` Kawnka maamula e.

Kolkuu qadderku fulayaanay jirin ` karti dabaashaaye
keddib-dhigid ma yeeshoo waqiis ` kaabad baan celine
kolay minit ku tahay daahi waa ` kuu Ilaah qoraye.

Kakab-hawo ku-meel-gaadhiddiyo ` kalal ku soo meerka
kolba soo yaraantiyo waqtiga ` kaabi-imadkiisa
kala-baydhi waayoo cimrigu ` kaw mar buu odhane.

Kabashkabash ma daayoo khalqiga ` keen naftaw darane
kadaaliga kudaalkiyo wuxuu ` koonka u maraa ba
kobtay ajashu taal buu kor tegi ` kol aanay dhaafayne.

Karaamada Rabbaa bixiya oo ` kii kastaan heline
kaalintaanu kuu qorin karkabo ` kaal-tun baan dhiqine
kaljeclaysi lagu waa adduun ` keni-adayggiise.

Kobsan-sheegga dulucdaydu waa ` kalal-baq ruuxeede
kurbashada waxaa iigu wacan ` Kaan arkaa mudane
Kawnku wuxuu na barayaa Ilaah ` Keli-ahaantiise!

DHAMMAAD